

# Carruurta da'da iskuulka gaartay!

Ma u baahan tahay caawimaad si aad  
cunto u iibsato xagaagan?

**S-EBT/SUN Bucks dhaqaalihii  
waa soo socdaa!**



\$120 cunto ayaa la siinayaa qoysaska haysta  
caruurta hela SNAP, Medicaid, cunto iskuul  
oo lacag la'aan ah ama qiimo jaban ama  
buuxiya shuruudaha kale ee u qalmidda.

**Sharciga kharashka dadweynaha  
MA khuseeyo dheefaha  
S-EBT/SUN Bucks.**

Ka fiiro boostadaada kaarka S-EBT/Sun Bucks ama raadi lacagaha lagu daro Kaarka  
Jihada Ohio ee aad hore u haysatay.

Qoysasku waxay heli doonaan hal kaar halkii cunug ee u qalma, waxayna heli karaan  
gunnooyinka maalmo kala duwan.

S-EBT/Sun Bucks lacagaha waxaa lagu isticmaali karaa baqaarada dukaamada, ama  
suuqyada beeralayda ee iibiyaa raashinka. Wuxaad iibsan kartaa cuntooyin ay ka mid  
yihii miro iyo khudaar, cuntooyin qalalan, hilib, caano, iyo ukumo. Lacagta S-EBT/SUN  
Bucks MA ahan SNAP mana saameynayso xaaladdaada socdaalka ama xaaladda  
carruurtaada.

Haddii aad u maleyneysa in aad heli lahayd S-EBT/SUN Bucks laakiin aadan helin, fadlan  
wac 1-866-244-0071 ama codsiga iyo Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo waxaad ka  
heleysaa sebt.ohio.gov. Turjumaano ayaa diyaar u ah inay ka jawaabaan su'aalahaaga.

[www.ohiosummerebt.org](http://www.ohiosummerebt.org)

